



Wargelinta Shacabka ee Bilaa Takoorka ee ADA/504

Wargelinta Bilaa Takoorka ah ee ku Salaysan Laxaad La'aanta Sida uu Dhigayo Sharciga Laxaad La'aanta Maraykanka ee 1990 iyo Qaybta 504 ee Sharciga Baxnaaninta 1973

Xeerka II ee Sharciga Maraykanka Laxaadka La' iyo Qaybta 504 ee Sharciga Dib u Dejinta waxa uu dhigayaa in DCYF aanayna ka takoorin shakhsiyaadka u qalma ee laxaadka la' barnaamijkeenada, adeegyadeeda, ama hawlaheeda.

Macluumaadka Barnaamijka

DCYF waxay, marka laga dalbado, bixin doontaa kaalmada munaasabka ah ee iyo adeegyada si loo xaqiijiyo xidhiidhka wax ku ool ah ee dadka u qalma ee qaba laxaad la'aanta lala samaynayo si ay si siman uga qayb geli karaan barnaamijyada, adeegyada iyo hawlaha DCYF. Kaalmooyinkan iyo adeegyadan waxaa kamid noqon kara turjubaada luuqada dhagoolka, waraaqaha oo lagu qoro farta indhoolka, iyo qaabab kale oo macluumaadka iyo xogta ay ku fahmi karaan dadka qaba laxaad la'aanta hadalka, dhagaha, ama indhuhu.

Waxka badalka Siyaasada iyo Nidaamyada

DCYF waxay samayn doontoo wax ka badal macquul ah oo siyaasada iyo barnaamijyada si loo xaqiijiyo in dadka laxaadka la' ay helaan fursad isku mid ah oo lagaga qayb galayo dhamaan barnaamijyada DCYF, adeegyada iyo hawlaha. Tusaale ahaan, shakhsiyaadka leh xayawaanka haga waxay iman karaan xafiisyada Gobolka, xataa iyada oo xayawaanka guud ahaan ay ka mamnuuc yihiin.

Dalabka Kaalmada ama Adeegyada si loo Xaqiijiyo Wax ku Oolnimada Xidhiidhka ama Waxka Badalka Siyaasada

Ruux kasta oo u baahankaalmo ama adeegyo si uu si wanaagsan la isku fahmo ama isbedelada siyaasadaha ama nidaamyada si uu uga qayb galo barnaamijka, adeegyada, ama hawlaha DCYF, waa inuu wargeliyaa mid kamid ah shaqaalaha sida ugu dhakhsaha badan, waxaa la doorbidayaa 48 saacadood kahor wakhtiga balanta la qabtay tahay:

1. Shaqaalaha DCYF, ama
2. Isku Duwaha DCYF ADA

dcyf.adaaccessibility@dcyf.wa.gov

Taleefanka: (360) 480-7230, dadka la gudbiyaa ha garaacaan 7-1-1

ADA kuma waajibiso DCYF inay qaado wax talaabo ah oo laga yaabo inuu wax ka badalo qaabka barnaamijyada ama adeegyada ama keeni kara culays dhaqaale ama maamul.



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

Cabashada

Cabashooyinka in ayna dadku helin barnaamijka, adeega, ama hawlaha DCYF ee ay ku hesho DCYF hal sano gudahood hadii sheegashadu ay ka timid si xun ula dhaqan ka timid laxaad la'aan, oo waa in loo diraa:

Helitaanka Barnaamijka DCYF ADA
Department of Children, Youth and Families (Waaxda Caruurta, Dhalinyarta, iyo Qoysaska)
1500 Jefferson St., SE
Olympia, WA 98501
dcyf.adaaccessibility@dcyf.wa.gov
Taleefan: (360) 480-7230
Washington Relay: 711 ama 1-800-833-6384

Gobolka Washington ugama baahna inay cidna bixiyo wax lacag ah oo qabta laxaad la'aan ama ruux wkasta oo qaba laxaad la'aan oo kharashkiisa ay bixiso wixii kaalmo ama adeegyo ama macquul ah ee caymis ah ama isbedelada nidaamka.

Inkasta oo DCYF ay leedahay siyaasad cabasho oo ADA oo gudaha ah, siyaasadan waxay u sahlaysaa shakhsiyadka qaba laxaad la'aanta inay ka xareeyaan cabashadooda takoorka laxaad la'aanta US Department of Justice's Civil Rights Division (Waaxda Xuquuqda Madaniga ah ee Waaxda Cadaalada Maraykanka) wixii ah xad gudubta ADA ee Xeerka II, the U.S. Department of Health and Human Services (Adeegyada Caafimaadka iyo Bilaa Aadanka ee Maraykanka) wixii ah ku xad gudubka Qaybta 504, ama Gudida Xuquuqda Bilaa Aadanka Washington.

US Department of Justice (Waaxda Cadaalada Maraykanka, DOJ), Waaxda Xuquuqda Madaniga ah

<https://civilrights.justice.gov>

Kula Xidhiidh Waaxda Cadaalada -Si aad uga Warbixiso Ku Xad Gudubka Xuquuqda Madaniga ah onleyna ahaan:
<https://civilrights.justice.gov/report>

Si aad ugu xarayso Cabashada ADA boosta, kasoo dejiso foomka Cabashada ADA:

www.ada.gov/t2cmpfrm.html

U dir foomka aad buuxisay:

US DOJ – Civil Rights Division (Waaxda Xuquuqaha Madaniga ah)
950 Pennsylvania Ave, NW
4CON, 9th Floor
Washington, DC 20530

Department of Health & Human Service and Office of Civil Rights (Waaxda Adeegyada Aadanaha & Caafimaadka iyo Xafiiska Xuquuqaha Madaniga ah)

Tilmaamaha xaraynta Cabashada Xuquuqda Madaniga ah:
www.hhs.gov/civil-rights/filing-a-complaint/complaint-process/index.html

Onlayn ahaan HHS - Daaqada Cabashada OCR:
<https://ocrportal.hhs.gov/ocr/smartscreen/main.jsf>

Si aad ugu xarayso Qaybta 504 ee Sharciga Baxnaaninta Cabasho ah boosta, kasoo dejiso foomka Takoorka ee Xuquuqda Madaniga ah:
www.hhs.gov/sites/default/files/ocr-60-day-frn-cr-crf-complaint-forms-508r-11302022.pdf

U dir foomka aad buuxisay:

Centralized Case Management Operations (Maaraynta Hawlaha Udub-dhexaadka u ah Kiiska)
U.S. HHS – 200 Independence Ave., S.W.
Room 509F HHH Bldg.
Washington DC 20201

Washington State Human Rights Commission (Gudida Xuquuqda Bilaa Aadanka Gobolka Washington, WSHRC)

www.hum.wa.gov

Si aad ugu xarayso Cabashada Takoorka Laxaad La'aanta ee la xidhiidha Qaabilaada Shacabka boosta, soo dejiso foomka Cabashada Qaabilaada Shacabka:
www.hum.wa.gov/file-complaint

U dir foomka aad buuxisay:

WSHRC – Olympia Headquarters
711 S. Capitol Way, Suite 402
PO Box 42490
Olympia, WA 98504

DCYF ma takoorto waxayna usiisaa helitaan siman barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda, dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, dhalashada, xaalada dhalashada Maraykanka ama soo geleytinimada, rabitaanka galmo ama aqoonsiga jinsiga, ciidan hawlgabay ama xaalada ciidamada, xaalada naas nuujinta, iyo jiritaanka naafo jidheed, dareen ama maskaxeed ama isticmaalka xayawaanka ruuxa hagaha. Haddii aad rabto nuqullo dhukumenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (DCYF Xidhiidhada Qeybaha) 1-800-723-4831 ama iimaylka communications@dcyf.wa.gov.